



FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA  
MINISTRY OF HEALTH AND  
HUMAN SERVICES

**WAR SAXAAFADEED KU SAABSAN TALLAALKA COVID 19**

**Monday, 08 February 2021**

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay qorsheynaysaa in Tallaalka Caabuqa Coronavirus-ka ay gaarsiiso guud ahaan dalka, iyadoo Qeybta ugu horreeysa tallaalka dalka lakeeno doono bishaan aan ku jirno ee febraayo 2021. Ujeedada waxay tahay in dadka soomaaliyeed laga tallaalo xanuunka karoonaaha ayadoo tallaalka uu yeelan doono wajijo kala duwan, sida ku cad qodobada hoose:

1. **Shaqaalaha Safka hore:** waxa Tallaalka qaadan doona Dhammaan shaqaalaha Caafimaad ee ka hawlgala xarumaha guud iyo kuwa gaarka loo leeyahay, shaqaalaha ku sugar Marinada lagsoo galo dalka sida koontaroollada Xuddudaha daldka, garoomada diyaaradaha, dekedaha iyo wadooyinka laga galo magaalooyinka, shaqaalaha dowladaha hoose ee sida maalinlaha ah ula falgala dadka ay u adeegayaan iyo macallimiinta.
2. **Dadka da'da ah (50jir iyo wixii ka weyn)**
3. **Dadka sida gaarka ah ula tacaala xanuunada ee qaba xanuunada hoos u dhiga difaaca jirka ama si joogto ah ula nool xanuunada**

Nooca Tallaalka ee Soomaaliya lakeenayo ayaa ah AstraZeneca/Oxford vaccine qiyaasta wajiga hore la heli doono ayaa ah **1,224,000**. Tallaalkan waxaa lagu keydin karra heerkul u dhaxeeya 2-8 cabbirka heerkulka ee degree centigrade taasoo macnaheedu yahay in lagu kaydin karo habka qaboojiyaha tallaalada ee dalkeennu leeyahay.

Wasaaradda Caafimaadka ayadoo si dhow ula shaqeyneysa hay'adaha WHO, UNICEF iyo Hay'adaha kale ee Caafimaadka kala shaqeeya waxay sida ugu dhaqsiyaha badan u billaabi doontaa Bixinta tallaalka COVID-19 isla marka ay timaado qeybta ugu horreeysa ee tallaalka.

Wasaaradda caafimaadka ee Soomaaliya waxay mudnaanta siisay diyaarinta habraacyada iyo Istaraatijiyyadda Tallaalka ayadoo kaashanaysa Hay'adaha bahwadaagta la'ah taasoo awood u siin doonta marka ugu horreysa inay tallaalka qataan shaqaalaha safka hore iyo dadka lanool cudurada halista u ah.